Ku soo dhawow dugsiyada sare ee degmada Halmstad.

Halkan waxa ku yaala warbixino muhiim ah oo ku saabsan dugsiyada sare ee degmadayada gacanta kuhayso kuwaas oo loogu talogalay inay oggaadaan ardayga iyo qofka mas'uulka ahiba. Warbixintan waxa laga helikaraa dugsikasta boggiisa internetka.

https://www.halmstad.se/sannarpsgymnasiet
https://www.halmstad.se/kattegattgymnasiet
https://www.halmstad.se/sturegymnasiet

maaraynta macaluumaadka shakhsiga

Marka aad adigu dalbato mid ka mid ah noocyada Waxbarashada- iyo maamulka suuqa shaqada, markaa macluumaad aad adigu shakhsiyan u leedahay ee aad soo xaraysay waxa la gelindoonaa diiwaanka kumbiyuutarka ee ay leeyihiin Waxbarashada- iyo maamulka suuqa shaqada ee dugsiga aad adigu dhigato.

Macluumaadka shakhsida ee la diiwaangeliyey waa lagama maarmaan si aanu annagu u maamulo dukumentiyada muhiimka ah tusaale ahaan shahaadooyinka, lacagta kaalmada ardayga la siiyo iyo boosaska waxbarashada. Nidaamka sharciga ah ee macluumaadka shakhsiga ah ee aad adigu leedahay lagu hananayo waa Maamul dawli ah iyo weliba hawl dan guud ah, (Sharciga ilaaliya macluumaadka, Qodobka 6aad (qaynuunka ilaalinta macluumaadka shakhsiga), Sabab 40-49)

Macluumaadka qaarkood ee aad adigu leedahay waxa la hayndoonaa inta aad waxbaranayso oo keliya (3 sannadood) kuwa kale sida tusaale ahaan koobiyada shahaadooyinkaaga ugu dambeeya waxa uu dugsigu xafidayaa ama haynayaa muddo lix bilood ah marka aad imtixaanka gasho kadib wixii intaa ka dambeeya waxa koobiyada shahaadooyinkaaga la gelindoonaa Arkiifiyada ay degmadu leedahay.

Waxbarashada- iyo maamulka suuqa shaqadu waxay ku khasban yihiin haddii aad adigu codsato inay saxaan, xanibaan ama ay ciribtiraan warbixinta (Sharciga ilaaliya macluumaadka, Qodobka 12aad ilaa kan 13aad). Sida ku qoran Sharciga ilaaliya macluumaadka qofkasta oo macluumaadkiisa meesha la geliyey wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado wixii warbixin ah ee isaga laga qoray ee ku jira sistamkayaga, marka uu qofku qoraal ahaan ku codsado, taas oo khuseysa wixii macluumaad ah ee ku saabsan qofka wax codsanaya. (Sharciga ilaaliya macluumaadka, Qodobka 15aad)

Macluumaadka khuseeya shakhsiga waxa ka mas'uula qaybta Waxbarashada- iyo guddida suuqa shaqada. Adiga xaq ayaad u leedahay inaad nagala soo xiriirto haddii aad doonayso macluumaad adiga kugu saabsan oo aanu annagu hayno, si aad u dalbato in haddii wax la khalday dib loo saxo, meelkale loo wareejiyo ama inaad adigu codsato si aanu annagu u xadidno daryeelida maacluumaadka, inaad diido ama inaad codsato in la tirtiro macluumaadkaaga la hayo. Waxaad annaga nagala soo xiriiri kartaa direkt@halmstad.se. Haddii aad la soo xiriirto xarunta xiriirara waxaad heleysaa qofka annaga nooga wakiilka ilaaliyaha macluumaadka (dataskyddsombud), waxaad si toos ah uga heleysaa telefoonka 035-13 70 00, magaalada Halmstad. Haddii aad dacwo ka qabto sida aanu annagu macluumaadka shakhsiga u maarayno waxaad xaq u leedahay inaad dacwad u gudbiso Hey'adda ilaalinta macluumaadka (Dataskyddsmyndigheten.)

Xeerarka iyo tilmaamaha loogu talogalay shabakadda waxbarashada

Dhammaan ardaygda dhigata dugsiyada sare iyo Waxbarashada dadka waaweyn ee degmada Halmstad waxa la siindonaa kumbiyuutaro, shabakad waxbarasho oo koonto looga qaybindoono qaybta waxbarashada ee Halmstad oo loogu talogalay inay xiriir ku sameeyaan macalinka iyo ardaygu

(Lärplattform). Si markaas ay arrintaasi u noqoto mid dadka oo dhan u wanaagsan, ammaana u noqota waxa Adiga lagaaga baahan yahay inaad akhrido waxyaabahan hoos ku qoran kadibna aad saxiixdo foomka lagu siindoono wakhtiga dugsigu bilaabmayo. Carruurta aan qaangaarka ahayn waxa looga baahan yahay inay xitaa u saxiixaan dadka ilmaha mas'uulka ka ah.
Anigu waan ogahay:

- in shabakadda waxbarashada loogu talogalay shaqadda dugsiga
- sharciyada iyo qaynuunku khuseeya halkan ayaa bulshada inteeda kalena khuseeya
- waxaan anigu barandoonaa arrimaha khuseeya anshaxa kombiyuutarada badan ee isku xiran ee loo adeegsado sida shabakad isku xiran (intranät)
- aniga ayaa shakhsiyan ka mas'uula waxkasta oo aan sameeyo ama aan qoro
- sidaa daraadeed waa inaan ilaashado ereyadayda aniga sirta ii ah (lösennord)
- haddii aan anigu si xun u istimaalo waxay arrintaasi keenikartaa in sistamka gebi ahaanba ama qayb ahaan layga xiro ilaa iyo inta ay go'aan soo gaarayaan maamulaha dugsiga iyo macalinkaygu.
- ma ihi anigu qof qarsoodi ah marka la istcimaalayo shabakada kombiyuutarada badan ee isku xiran
- magac loogu yeero (shakhsiyaadkaa aqoonsigooda la qarinayo) waa sida caadiga ah markay noqoto arrimaha khuseeya xuquuqda iyo waajibaadka.

Sharciyada halkan khuseeyaa waxay khuseeyaan bulshada inteeda kale. Anigu ma doonayo inaan dadka kale dhibaato u gaysto sida aannan aniguba u doonayn in anigaba dhibaato laygeysto!
Waxaad saxeexaysaa foomka adiga oo akhriyaya qoraalka korku ku xusan. "Ku soo dhawow dugsiyada sare ee degmaada Halmstad"

Xasaasiyad/qof aad xasaasi u ah

Maadaama ay jiraan dad xasaasiyad ku leh/dad aad ugu nugul lawska caadig ah, lawska dhulka ka baxa iyo yicibta waa miro sida lawska oo kale ah kuwaas oo dhan waa ka mamnuuc in lagu cuno dugsiga. Weydii macalinkaaga haddii ay jiraan waxyaabo kale oo aan la ogolayn in lagu cuno dugsiyada sare sababtuna ay tahay waxa allerji ku ah ardayda iyo shaqaalaha, waxa tusaale ahaan ka mid ah liin-dhanaanta.

Booqashada

Maadaama ardayda ammaankooda la ilaalinayo waxa loo baahan yahay in markuu qofku dugsiga soo booqanayo uu risebshanka iska diiwaangeliyo (receptionen). Dadka aan dugsiga ka shaqayn ama ka midka ahayn iyo ardayda kale ee aan dugsiga dhigantoona looma ogala inay dugsiga joogaan

Digniinta dabka (Brandlarm)

Dhammaan dhismayaasha oo dhami si otomaatig ah ayey ugu xiran yihiin digniin sheegaha dabka. Sida ugu dhakhsaha badan ayaad adigu uga baxaysaa dhismaha (dugsiga) marka uu diniin sheegaha dabku qayliyo kadibna waxaad adigu tegeysaa/aadaysaa meesha lagu kulmo ee uu macalinkaagu warbixinta kugu siiyey.

Kaarka baska

Si aad adigu xaq ugu yeelato in lagu siiyo kaar bas, waa inay noqoto masaafada u dhaxaysa guriga aad deggen tahay iyo dugsigu 6 km iyada oo laga xisaabinayo sistamka kaararka baska ee degmada. Kaarku malaha xuduud markay noqoto inta goor ee aad maalintii dugsiga ugu soo raacayso haday noqoto bas ama ama tareen inta sannad dugsiyeedku socdo oo dhan. Kaarku wuxuu shaqaynayaa inta u dhaxaysa 04.00 – 22.00 maalmaha caadiga ah iyo wakhtiyada dugsigu fasaxa yahay, laakiin ma shaqayndoono xilliga fasaxyada ee diinta masiixiga- iyo xilliga xagaaga. Haddii uu kaarka basku kaa lumo waa la xirayaa kadibna waxa lagu siinayaa mid cusub. Sida ugu dhakhsaha badan ayaad ula soo xiriiraysaa risebshanka haddii ay

sidaa kugu dhacdo. Haddii aad kaarka baska loo ilowdo ama hilmaanto adiga ayaa kharashka baska iska bixinaya marka aad dugsiga imanayso iyo marka aad gurigii ku laabnayso. Kaarka baska waxa laguu oggol yahay in lagu siiyo ilaa iyo xilliga gu'ga ee aad buuxinayso 20 sannadood.

Caymiska

Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada sare waxay ku jiraan caymis haddii uu wax shil ahi soo gaaro wakhtiga ay dugsiga dhiganayaan ama wakhtiga ay joogaan meelaha wakhtiga firaaqada waxay caymiska kaga jiraan shirka caymis ah oo ay degmada Halmstad heshiis la saxiixatay. Heshiiskaas caymiska waxa laga helikaraa bogga internetka ee degmada meesha ay ku qoran tahay carruur & waxbarasho under "Barn & utbildning". Waxaad kaloo halkaa ka heleysaa foomka loogu talogalay markuu qof dhaawacmo

La taliyaha dhinaca bulshada (kurator)

La taliyaha dhinaca bulshadu waxaa la heleyaa wakhtiyada ay ardaydu dugsiga dhiganayaan. La taliyuhu wuxuu u shaqeeyaa sida marka ay radaydu doonayso inay tusaale ahaan kala hadlaan:

- halka ay waxbarashada dugsigu u marayso iyo/ama guriga
- xiriirka uu ardaygu la heelyahay dadka isaga ku xeeran, kuwa uu wax labaranayo iyo kuwa waxbaraya
- su'aalaha khuseeya nolosha
- murugo/welwel iyo xaalado dhibaato
- noocyada kala duwan ee mukhaadaraadka

la taliyaha dugsigu wuxuu sidoo kale u shaqeeyaa inuu siiyo tallooyin oo uu tusaale ahaan wargeliyo:

- dhaqaalaha ardagya, deeqaha waxbarasho
- inuu hey'addaha kale la xiriiro
- arrimaha khuseeya dhaqaalaha qoyska, ama caawimooyinka kale
- dadka naafada ah; arrimaha socdaalka iyo su'aalaha khuseeya qaxootiga

Sidoo kale wuxuu la taliyaha dugsigu u shaqeeyaa inuu xitaa ardayda oo guruubada ah uu xiriir la sameeyo, iyo sidoo kale sidii looga hortegilahaa mukhaadaraadka, iyo noocyada ay ka midka yihiin dadka kale oo sharfooda meel lagaga dhaco in la faquuqo, in loo geysto dhibaato dhinaca galmada iyo nacaybka dadka shisheeyaha. Xitaa dadka waalidiintu way la soo xiriiri karaan la taliyeyaasha. Haddii loo baahdo waxa la taliyeysshu meelkale ayey kuu sii gudbinkaraan oo cidkale ayey kugu xirikaraa

Fasaxa

Arrimaha gaarka ah ee fasaxa waxa ardayga macalinkiisu u oggolaankaraa ugu badnaan sadex maalmood guud ahaan marka laysku daro sannad dugsiyeedkiina waa ugu badnaan lix maalmood. Maamulaha ayaa go'aaminaya wakhtiga uu isagu rabo inuu ardaga fasax siiyo. U fiirso wakhtiga ardayga fasaxa loo ogglaaday wuu xadidan yahay. Inta sannad dugsiyeedka lagu jiro waxa jira sadex usbuuc oo todobaalke fasax ah ((sportlov, påsklov iyo höstlov) intaa waxa sii dheer(jullovet). Waxa bahoon in fasaxyadaas lagu aadigyo haddii meel loo dhoofayo iyo waxyaabihii kaleba. Codsiga si gaar ah ayaa loo samaynayaa foomkana waxa laga helayaa www.halmstad.se

Qorshaha daryeelida isku midka ah

Waxaynu annagu ka shaqaynaynaa si loo helo jawi shaqo oo wanaagsan annaga oo ka hortegeyna waxna ka qabanayna waxkasta oo ku saabsan qasbid, sharata qofka oo meel lagaga dhaco ama la caayo iyo qofka oo la takooro. Dhammaan marka dadku dugsiga joogaan waa inay dareemaan ammaan iyo ixtiraam.

Marka qofka la sharaf ridoayo waxa sameeyaa hal qod ama dhowr qof oo ku sameeya hal qof ama dhowr qof. Meel ka dhaca qofka waxa lagu samaynkaraa bey'adkasta – markii la rabo. Qofka oo meel lagaga dhacaa wuxuu dhicikaraa marmar ama wuxuu noqokaraa nidaam soo noqnqoda. Meelka dhaco ama sharafta oo qofka laga ridaa waxay dhexmarikataa ardayda dhexdooda ama shaqaalaha iyo ardayda. Qofka sheeganaya in isaga ama iyada meel lagaga dhacay waa inuu qofkaasi marwalba si dhab ah arrintaa u qaato oo uu meel adag ka istaago.

Dhammaan dadka jooga dugsiga waxaa saaran mas'uliyad, haddii shakiyimaado ama la xaqiijiyo nooc ka mid ah meelka dhaco, waxa loo soo gudbinayaa shaqaalaha dugsiga. Meel ka dhacu wuxuu noqonkaraa dhibaato qarsoon. Sidaa daraadeed waa muhiim inay dadka oo dhami digtoonaadaan oo ay waxka qabtaa haddii qof dhibaato loo geysanayo. Weligeed ma fiicnaanayso haddii marka qofka dhibaato loo geysanayo uu qofka ka iska dhindha tiro oo aanu waxba ka qaban, xaaladau kama sii xumaanayso haddii intuu qofku arrinta galo uu wax ka qabto dhibaatada qofka loo geysanayo.

Cayda ama sharaf ridku wuxuu noqonkaraa:

- dhinaca jirka (tusaale qofka oo wax lagu dhufto iyo qofka oo la riixo)
- wax la xiriira luqadda (tusaale ahaan hanjabaad ama qofka oo cay loogu yeero)
- qofka oo dhinaca arrimaha bulshada lagala dagaalamo (tusaale ahaan qofka oo la faquuqo, dacaayad laga fidiyo)
- qoraalo- iyo sawiro (tusaale ahaan calaamado qoraalo malmaluuqan ah oo cunsuriyada tilmaamaya oo gidaarka lagu sawiro, warqad iyo iimeyl, fariin- iyo sawir telefoonka ah)
- dhinaca maadiga (tusaale ahaan lugta bushkuleetiga oo hawada laga siidaayo iyo qalinka oo qofka laga jebiyo)

qasbida iyo hajabaada ku saabsa qofka oo la qasbo dugsigu ma aqbalidoono maamulaha ayaana dacwad booliiska u gudbinaya.

Qorshaha daryeelka isku midka ah (likabehandlingsplanen) dhamaantii waxa laga helayaa bogga internetka ee dugsiga.

Shilka

Haddii inta aad adigu dugsiga joogto ama aad jirato waxaad u tegeysaa kalkaaliyaha caafimaadka. Markuu qofku dhaawacmo waxaa loo sheegayaa shirkada caymiska ee degmada. Si loo hubiyo bey'adda shaqada oo looga hortegato shilalka, waxaanu adiga kaa codsanaynaa inaad qorto warbixin ku saabsan dhaawaca ama siday khatartu u dhacday, cayda ama hajabaada khuseysa qasbida. Foomka waxaad ka heleysaa kalkaaliyaha caafimaadka ama Share-point..

Sigaarka laguma cabo

Dhammaan dugsiyada sare ee Halmstad sigaarka laguma cabo inta dugsiga la joogo. Taas macnaheedu waxa weeye ardayda iyo shaqaalahba sigaar ma cabikaraan inta dugsiga la joogo. Sida uu dhigayo sharciga tubaakada laguma isticmaalikaro sigaarka qolalka dugsiyada. Arrintani waxay xitaa khuseysaa meelaha bannaanka ee dugsiga u dhow (sharicga tubaakada 1993:581). Haddii uu gef soo noqnoqdo dhowr goor waxa markaa ardayga la siinayaa qoraal digniina.

Jirada-/maqnaanshaha ardayga

Jirada-/maqnaanshaha ardayga waxa la soo wacayaa 0515-77 70 14 inta ka horaysa saacada 12.99 (wixii ka dambeeya markay saacadu tahay 12.00 waxa ardayga loo diiwaangelinyaa inuu maqnaan doono maalinta soo socota.).
Inta aad telefoonka ku hadlayso ee aad maqnaanshaha ardayga sheegayso markaad doonto telefoonka waad joojinkartaa. Markaad sheegto inuu ardaygu maqnaandoono waxaad heleysaa caddayn. Haddii aad telefoonka dhigto inta aanad caddaynta helin kahor markaa wargelintii jirada ee ardaygu way joogsandoontaa.

Tobanka lambar ee ardaygu waa inay sax noqoto markaad qorayso wargelinta maqnaanshaha si ay diiwaangelintu sax u noqoto. Haddii ad adigu maqantahay wax ka badan hal maalin waa in markaa maalinkasta maqnaanshaha la soo wargeliyo dugsiga. Haddii aan maqnaanshaha la soo sheegin markaa waxay noqonaysaa maqnaansho aan la oggolayn. Haddii aad adigu maqnaato wax ka badan todoba maalmood oo isku xiga markaa waa inaad takhtarka ka keento warqad caddayn ah. Haddii uu qofka ilmaha mas'uulka ahi uu gelikaro sistamka maqnaanshaha ee dugsiga 24 halkaa ayaa markaa laga samaynkaraa maqnaanshaha.

Haddii aad jirato adiga oo dugsiga jooga waxaad marka hore wargelinaysaa macalinkaaga kadibna waxaad u sheegaysaa daryeelka ardayda. Xafiiska risebshanku ma qaabiloonaan in la waregeliyo jirada!

Booqashooyinka aad ogtahay inaad tegeyso ee aad hore ballansatay (booqashada takhtarka ama iwm) waa inaad marka hore sii sheegto haddii kale waxa lagu xisaabinayaa in aanu sax ahayn. Adiga ayaa ka mas'uula inaad ogeysiiso macalinka wax kuu dhigaya marka aad rabto inaad casharka fasax ka qaadato.

Sharciga cusub ee dugsiyada ayaa dhigaya in loo sheego mas'uulka ilmhaha markuu ardaygu si sharci daro ah u maqanaado (maqnaanshaha lama soo sheegin) isla maalinta uu ilmuhu maqnaado. Skola24 ayaa maaraynaya iyaga oo fariin mas'uulka ilmaha ugu soo diraya iimeylka. Si arrintaa loo sameeyo waxa loo baahan yahay in iimeylka ma'uulka ilmuhu uu ku diiwaangashan yahay sistamka skola24.
Haddii ay jirto booqasho hore loo sii qorsheeyey waa khasab in codsiga arjiga la soo xareeyo. Eeg meesha cinwaanka ay ku qoran tahay fasax (Ledighet.).

Kalkaaliyaha caafimaadka

Adeegyada daryeelka caafimaadka dugsiyadu shaqadooda ugu horayn waa kahortag. Marka aad hayso su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo hab nololeedkaaga annaga ayaad noo imanaysaa, haddii aanad dareemeyn inaad caafimaad qabto ama aad dhaawanacanto, waxa laga yaabaa inaad cadaadis dareemayso oo aanay xaaladaada caafimaad fiicnayn. Haddii loo baahdo waxaanu kuu sii gubinaynaa takhtarka dugsiga, qaabilaada qaybta dhalinyarada, qaabilaada qaybta maskaxda, rugta caafimaadka, jimicsiga jirooyinka iyo qaarkale oo badan. Dabcan qofka waalidka ah laftiisu wuu soo dhawaankaraa inuu annaga nala soo xiriiro.

Maadaama aad adigu dugsi sare dhigato waxaanu annagu kugu qiimaynaynaa inaad go'aan ka qaadankarto in aanu annagu u helno waraaqahaagii caafimaadka ee dugsigaagii hore si annaga naloogu soo diro.

Haddii uu qofka mas'uulka ahi qabo fikrad kale, wuxuu la xiriiri karaa kalkaaliyaha caafimaadka dugsiga.

Kaalmada waxbarashada dhaqaale ee ardayda

Kaalmada waxbarashada dhaqaale ee la siiyo ardayda waxa xaq u leh ardayda wakhti buuxa dhigata dugisyada sare isla markaana kuleh wadanka Iswiidhan sharci deggenaansho ah. Marka dugsiga uu dhigto ardaygu u arkaan in aanu ardaygu dhigan wakhti buuxa waxa la orankaraa waa markuu ardayg si sharci

daro ah u maqnaan ama uu ardaygaasi dugsiga ka maqnaado laba usbuuc oo isku xiga isaga oo aan wax caddayn ah u hayn meeshii uu ku maqnaa, dugsigu wuxuu markaa ku khasban yahay inuu warbixin u soo diro hey'adda CSN. Markaa iyagu waxay go'aaminkaraan in aanu ardaygaas la siin kaalmada dhaqaale ee ardayda la siiyo. Haddii marka ardayga loo diido kaalmada waxbarashada dhaqaale waxay xitaa saamayn ku yeelankartaa kaalmada dhaqaale kale ee faamliga la siinayo iyada oo laga jarayo wakhtigaas. Waxa kaalmadaa dhaqaale ka mid ah lacagta kabida carruurta, lacagta la siiyo markuu waalidku keligiis yahay iyo lacagta kadibada guriga.
Hey'adda CSN way ku khasban yihiin inay warbixin u diraan khasnadda caymiska dawlada (försäkringskassan.).
Warbixin intaa dheer waxaad ka heleysaa bogga internetka ee CSN: www.csn.se
Dhammaan qorshayaasha maqnaanshaha ee la sii qorsheeyey (booqasho takhtar ama iyo wixii la mid ah) waa khasab in hore loo sii sheego haddii kale waxa loo xisaabinayaa maqnaansho sharci daro ah. Adiga ayaa ka mas'uula inaad u sheegto macalinka wax kuu dhigaya marka aad maqnaanayso ee aanad carasharka imanayn.

Xog qarin

Sida uu dhigayo sharciga sirtu dhammaan shaqaalaha dugsiga waxa ku waajib ah in wixii xog ee loo sheego ay qarsoodi noqoto. Kalkaaliyaha dugsiga, dhakhtarka dugsiga, lataliyaha arrimaha bulshada iyaga si gaar ah ayaa wixii xir ah ee loo sheego ay u qarindoonaan. Haddii ay shaqaalaha dugsigu oggaadaan inuu arday khatar ku jiro, tusaale isticmaalka mukhaadaraad ama uu ardaygu ku sugan yahay xaalad xun oo la xiriirta dhinaca bulshada waxay markaa shaqaalaha dugsigu ku khasban yihiin inay warbixin u gudbiyaan shaqaalaha naamulka arrimaha bulshada.